



Xogtii ugu dambaysay ee Sahanka Iskuulada Guuleystay

Bulshada PPS ee Qaaliga ahoow,

Mahadsanid!

Horaantii sanadkan, Dugsiyadda Dadweynaha ee Portland waxay bilaabeen sahank jawiga dugsiga 2019, oo loo yaqaan "Sahanka Dugsiga Guulaystay." Tani waxay ahayd mashruuc iskaashi oo ay sameeyeen PPS iyo Panorama Education. Waad ku mahadsantihiin dhamaan kuwa ka qeyb qaatay - taladaadu waxay lagamamaarmaan u tahay fahan wanaagsan oo ku saabsan jawiga hadda jira ee dugsiyadeena. Waxaanu helnay jawaab celin weyn:

- 14,119 qoys (36%)
- 9,442 arday, fasalada 5, 7 iyo 10 (86%)
- 3,156 shaqaale (61%)

Ku saabsan Natijjooyinka

Natijjooyinka waxaa loo isticmaali doonaa dugsiyada si looga caawiyo inay fahmaan baahida ardaydooda iyo qoysaskooda markay horumariyaan qorshayaashooda horumarinta dugsiga. Heerka degmada, waxaan u isticmaali doonaa macluumaadkan si aan ugu qaabeyno qorshaheena istaraatijiyyadeed. Wuxuu tixgelineynaa natijjooyinkan in ay noqdaan kuwo asaasi ah, ama bilow ah, si loogu sameeyo isbarbardhig mustaqbalka ah iyo cabiraan horumarka. Sankanka noocan ah ayaa la qaban doonaa sanad kasta, waxaan horeyba ugu qorsheyneynaa 2019-20.

Maxay PPS u sameeysaa sahamada sanadlaha ah?

Waxaanu noqonaynaa nidaam ay xog wado - tani waxay naga caawineysaa samaynta go'aano la wargaliyay. Xogta ka timid tan iyo qiimeynaha kale ee waxbarasho way na hogaaminayaan inta aan ku dadaaleyno dugsiyo leh ammaan, jawaab celin iyo taageero. Muhiim ayay ku tahay in aad ogaato in sahanka cimilada ay ka mid tahay qaybo badan oo ka mid ah Nidaamka Meelaha badan Isku xiranee leh Taageerooyink (MTSS).

Maxay tahay MTSS?

MTSS waa qorshe diiradda saaraya "ilmaha oo dhan." MTSS waxay taageertaa kobaca tacliimeed iyo guulaha laakiin wuxuu sidoo kale diiradda saaraa dabeeecada, baahida dareenka-bulshada, iyo soo xaadiritaanka. Waxyaabahan oo dhan ayaan tixgelinnaa si aan u tixgelinno si aan u siino taageerooyin kala duwan dhamaan ardayda.

Ma rabtaa inaad ogaato wax badan oo ku saabsan sahankan?

Nagala soo biir 14ka Juun laga bilaabo 5-6:30 p.m. dhismaha BESC oo ku yaal 501 N. Dixon St oo ah kulan bulshadeed oo leh Panorama si wax badan uga ogaato natijjooyinka heer degmo.

Waxaan bixin doonaa xanaano caruur, cabitaanada fudud iyo turjubaano ku jira shan luqadood oo taageerna.

Shirkani ka dib ayaa natiijooyinka degmada dhammaanteed la soo galin doonaa iyaga oo online ah shabakada pps.net.

Mahadsanid,

Brenda Martinek,
Taliyaha Adeegyada Taageerada Ardayga